When your child has additional needs

Somali

contact a family

Ee qooysaska leh caruurta curyaanka ah

oo ku dersamayso

the Lady Hoare Trust

Markii oo cunuggaada qabo baahi dheeri ah

Tusmo-hagidda waaliddiinta xanaaneeyo cunugga curyaanka ah ama ku jiro xaalad caafimaad gaar ah, ay ku jiraan cudurada dhifka ah

Agosto 2005

Adeegga tarjumidda iyo qoraal u beddelidda

Waxay Contact a Family ballanqaadaysaa inay wax ka qabanayso baahida qooysaska oo luqaddooda koowaad aysan ahayn Ingiriisiga waxaana si joogto ah ugu samaynaynaa dib u eegid iyo qiimayn adeegyadeena si loo hubiyo inaan sidaan u samaynayno iyo inaan eegno siyaabaha aan ku sii hagaajin karno.

Waxuu khadkayna addegyada lee-yahay adeegga tarjumidda ee magacooda yahay Language Line. Waxay micnaheedu tahay inaan kuu qabanqaabin karno inaad la hadasahid la-taliyaha waalidka luqado kasto oo kor u dhaafaayo 100 luqadood .
Waxaad u baahan tahay oo keliya inaad naga soo wacdid 0808 808 3555 oo aad na siisid lambarka telefoonkaaga iyo luqadda aad jeceshahay annagaana dib kuu soo wacayno iyada oo la so maraayo tarjubaan, sida caadiga ahna waxay qaadanaysaa xoogaa daqiiqado ah gudahood . Waxuu khadka caawinaadda uu lee-yahay oo kale telefoonka qoraalka, oo laga soo xiriiri karo 0808 808 3556

Waxaa kale waqti xaadirka lagu heli karaa luqadaha soo socdaan:

Ingiriisi, Gujaraati, Hindiga, Punjaabiga iyo Urduuga.

Warqaddeena Amaahda canshuurta(Tax Credits) waxaa xitaa lagu heli karaa luqadaha soo socdaan:

Carabiga, Faarsiga, Mandarinka iyo Soomaaliga.

Waxaa lagu soo waydiisan karaa khadkeena caawinaadda ama waxaa laga soo saaran karaa shabakaddeena internet-ka oo ah:

http://www.cafamily.org.uk/translations.html/

Ilaa aan loo sheegin si kale dhammaan waxyaabaheena daabacan waxay haatan lagu heli karaa oo keliya Ingiriisi

Tusmo

Soo bandhigid

Adeegyada Bulshada

Xanaanada Nasashada

Caafimaadka

Curudada Dhifka ah

Xanaanada caruurta

Waxbarashada

Gargaarka lacageedka

Ciyaarta, Raaxaysiga iyo Birirfta

Xubnaha kale ee Qooyska

Ururada Iskaa Wax U Qabso, Kooxaha Kaalmaynta iyo La soo xiriiridda Waxtarka leh

Wararka dheeriga ah ee ku saabsan Contact a Family

Waxuu kani yahay tusmo-hagaha waaliddiinta xanaaneeyaan caruurta curyaanka ah ama xaaladooda caafimaad gaarka tahay, ay ku jiraan cudurada dhifka ah. “Markuu Cunuggaaga qabo Baahida Dheeriga ah” Waxuu yahay weerta casri ah ee “Xanaanaynta Cunuggaaga” waana daabacaad ay wada jir u soo saaraan Contact a Family iyo Carers UK. Contact a Family waxay ku mahdinaysaa Carers UK fasaxa ay inoo siiyeen inaan dib ugu daabacno halkaan qaybo ka mid ah qoraalka asalka ah iyo inaan ugu mahad celino shaqada asalka ee qooraada Sheila White iyo tifaftiridda Annie Jackson.

Sawirada ku xusan bogagga 3,4,6 iyo 9 waxaa qaaday Sam Tanner.

Waxaa soo tifaftiray Clare Gibson, Yvonne McGahren iyo Matthew Henderson
Waxaa biirinta leh Anna King, Paul Soames, Susan
Green iyo Kirsty Wood.

Haddii aad ku jeclaan lahayd inaadan ku akhrisan Ingiriisi, laakin aad fahmaysid ereyada lagu hadlo, waxaa lagu heli karaa khadka caawinaadda isaga oo ah Ingiriisi cajalka maqalka tusmadaan oo bilaash ah.

Waxuu ku diiwaan gashan yahay Samafal No. 284912
Company limited by guarantee
Waxaa laga diiwan geliyay England iyo Wales No. 1633333

Soo bandhigid

Waxaan ka soo baxnay isbitaalka annaga oo fajacsan oo keli ah. Waxay nagu qaadatay inaan sugno si aan u la hadalno la-taliye labo toddobaad. Waxay labadaas toddobaad inoo la ekaadeen kuwa aan dhammaanayn, sidaas darted waxaan si toos ah u baxnay halka uu internet-ka yaalay si aan u helno warar dheeri ah, waxaan gabi ahaan ahayn kuwo argagaxsan. Waxaa markaa laguu daayay inaan wax ka qabato cunugga qabo cudurka dhifka ah. Waxaan u malaynayaa inaan maray waqti tiiraanyo leh, waxaad la tiiraanoonaysaa cunugga aad u maleynaysid inaad haysatay, iyo cunugga aad doonayso inaad haysato.'
Waalid

'Waxay saaxibada iyo qaraabada u soo safteen inay ku siiyaan garab si aad u ooyso laakin waxa aan xaqiidii doonaayay waxay ahayd inaan la kulmo qof sida aniga oo kale ah. Markii aan kala xiriirray Caafimaad Booqadadkaada coodsigaan waxay iigu jawabtay 'Oh maya gacalie! Ma jiro qof sida adiga oo kale ah.'
Waalid

Waayo-aragnimada kor ku qoran wuxuu muujiinaaya in ogaahasha in cunuggaada uu curyaan yahay waxay noqon kartaa dhib iyo fajacnaan. Waxay waalidiinta iyo xanaaneyaasha u baahan yahiin kaalmayn, warar iyo talo-siin ee lagu cabiray baahidooda gaarka ah si ay wax uga qabtaan. Haddii aad ku sugan tahay xaaladdaasi oo kale, ma garanaysid halkaa ka doonanaysid wararka, talo-siin iyo in lagaa kaalmeeyo dhinaca lab-lakaca, gaar ahaan markii uu cunuggaada lagu arkay markii ugu horaysay inuu qabo curyaanimada. Waxaa laga yaabaa inaad isku dayeesid inaad la qabsatid dareemo baaxad leh, isla sidaasina oo aad ugu daashay baahida jireed ee waalidnimada. Si kastaba ha noqotee, waxaa jira wax ka qabad wayn ee ah kaalmayn, oo aadan ogayn.

Ujeeddada buuggaan yar waxay tahay in lagu siiyo xoogaa tilmaamooyin ah nooca caawinaad oo aad u baahan kartid iyo xirfaadlayaasha aad la kulmi doontid. Waxaay xirfadlayaashaan (hawlwadeenka bulsho, Takhtarka Guud, kaal-kaaliyaha farsamada iyo caafimaad booqadka, barayaasha iyo ka-caawinayaasha takhasuska leh ee dugsiga cunuggaada, tusaale ahaan) awood u lee-yahiin inay kaa siiyaan gacan dheeri ah ama noocyo kala duwan oo kaalmayn ah intii uu cunuggaada soo koraayo.

Waxuu liiska soo socdo kaa caawinayaa si aad u ogaatid cidda ay yahiin iyo sida ay kaaga caawini karaan iyo kaalmada ay ku siin karaan.

Waaxda Adeegyada Bulshada

Waaxda maamulka deegaankaaga ee Wales iyo England. Waxaa Scotland looga magacaabaa Waaxda Shaqada Bulshada, Waqooyiga Ayrland-na Hay'adda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada. Waxaa dhici karto in waaxyada qaarkood ay ku xiran yahiin waaxyo kale, tusaale ahaan, Adeegyada Bulshada iyo Waaxda Waxbarashada ama ay lee-yahiin magac ah sida Adeegyad Jaalliyadda.

Waxay Adeegyada Bulshada lee-yahiin awoodda ah inaay bixiyaan caawinaad wax ku ool ah iyo inay kaalmeeyaan cunuggaada iyo adigaba sidii hal qooys. Waxay bixi karaan xanaanada nasashada, cuntada xanaanaynta caruurta, caawinaadyo iyo qalab iyo gacan ku siinta guriga. Waxay maamulo deegaan oo badan lee-yahiin kooxo u gaar ah Caruurta Curyaanka ah.

Adeegga Caafimaadka

Waxay ilaalinayaan caafimaadka cunuggaada waxayna siinayaan daawaynta marka loo baahdo. Takhtarka Guud ee cunuggaada ama xirfadlaha isbitaalka waxay ku yahiin ' furaha albaabka' ee adeegyada kale ee caafimaad oo ah sida caafimaad booqadka, hadal ku daaweeyaha ama jir-daaweeyaha. Waxay kale oo ay bixin karaan qalabka dhaq-dhaqaaqa.

Adeegga Waxbarasho ama Maamulka Waxbarashada Deegaanka (LEA)

Waxuu danaynayaa inuu siiyo waxbarashada ku habboon cunuggaada. Waxaa kale uu bixin karaa caawinaad dheeri ah iyo kaalmaynta caruurta oo lagu qiimeeyay inay qabaan baahida gaarka ah ee waxbarasho (SEN).

Ururada Iskaa-wax-u Qabso iyo Kooxaha Kalmaynta

Waxay ku siin karaan warar, caawinaad wax ku ool leh, inay kula xiriiriyaan waaliddiin kale, khadka caawinaadda ama imaatanka xarumaha talosiinta.

Waaxda Shaqada iyo Hawlgabka

Waxay siinaysaa gargaarka maaliyadeed adiga iyo cunuggaada haddii aad ku sifoodid waxyaabaha loo baahan yahay .

Waxay dhammaan adeegyadaan kala duwan, waqtiyadaas, samaynayaan qiimaynta ku saabsan cunuggaada. Waxay kuu keeni kartaa isku buuqid maadaama aad tahay waalid markii xirfadle kale kuu sheego inay samaynayaan qiimaynta cunuggaada oo adiguna aad ogayn waxa ay ka baarayaan ama ujeeddada laga lee-yahay. Si layskugu dayo in saca loo sameeyo intii suurto gal ah, waxay shuruudaha loo isticmaalay bug-yarahaan ku qoran yahiin halkaan.

Qiimaynta Ogaanshaha Cudurka

Waxaa soo sameeyaan Takhtarka Guud, la-taliyaha isbitaalka iyo xirfadlaha caafimaadka si loo ogaado curyaanimada ama xaaladda uu ku sugan yahay cunuggaada.

Qiimaynta daawaynta u socoto

Waxaa soo sameeyaan Takhtarka Guud, la-taliyaha isbitaalka iyo hawlwadeenada kal-kaalinta dugsiga oo la socdaan caafimaadka cunugga iyo horumarkiisa sanadaha oo dhan.

Qiimaynta waxbarasho

Waxaa inta badan soo sameeyo dugsiga, meelaha qaarkoodna Takhtarka Maskaxda ee Waxbarashada, si loo arko waxyaabaha iyo kaalmaynta uu baahan yahay cunuggaada.

Qiimaynta maaliyadeed

Si loo eego xaladdaada maaliyadeed oo ah in la eego haddii aad mudan tahay gargaar ama deeq maaliyadeed. Waxay kale oo ay Adeegyada Bulshada samaynayaan qiimaynta maaliyadeed haddii ay doonayaan in lagu bixiyo kharash caawinaadda waxqabadka leh ee la sameeyay.

Qiimaynta Adeegyada Bulsho (ama baahida horseedi karto qiimaynta)

Waxaa sameeyo hawlwadeenka bulsho isaga oo xiganaayo Children Ac (Xeerka Caruurta) si uu ugu qiimeeyo baahida cunuggaada u qabo kaalmo inuu ka helo adeegyada bulsho. Markii la qiimeeyo baahida cunuggaada, waxuu hawlwadeenka bulsho kaala hadlaayaa adeegyada oo u oggol yahay in la siiyo, haddiiba uu jir mid. (xitaa haddii cunuggaada loogu qiimeeyay adeegyada loo baahan yahay, waxaa dhici karto in la siin.

Waxaa xaq loo leeyahay qaar ka mid ah adeegyada oo kaliya, qaarna si u garasho ah yaa loo bixiiyaa. Waxuu maamul kasto lee-yahay mudnaan kala siinta ee uu ku bixiyo adeegyada. Kala soo xiriir Contact a Family khadka caawinaadda haddii aad u baahan tahay warar dheeri ah) Markaa ka dib waxuu hawlwadeenka bulsho soo saarayaa qorshaha xanaanada, oo lagu soo koobaayo adeegyada ah in la dhiibo. Waa in lagaa siiyaa nuqul waana in sanad kasto lagu sameeyaa dib u eegid.

Qiimaynta waalidka ama xanaaneeyaha

Guud ahaan UK, waxaad xaq u lee-dahay inaad waydiisato qiimaynta waxyaabaha aad u baahan tahay bacdamaa aad tahay waalid ama xanaaneeye. Waxuu The Carers (Equal Opportunities) Act 2004 (Xeerka Xanaaneeyayaasha (Fursadaha Sinaanta) ee 2004), oo dhaqan galay Abriil 2005, siinayaa xuquuq dheeri ah xanaaneeyayaasha England iyo Wales. Waxuu Xeerkaan ka dalbanayaa maamulada deegaanka inay ku wargeliyaan xanaaneeyayaasha xuquuqdooda si ay u qiimeeyaan iyo xitaa si ay u sugaan shaqadaas,

waxbarasha nolosha la socoto iyo raaxaysiga waxay yahiin kuwo la tixgelinaayo markii xanaaneeyaha la qiimeeyo. Xasuuso inaad soo waydiisato Hawlwadenkaaga Bulsho waxii ku saabsan sidaan.

Adeegyada Bulshada

Sida ay qabaan Xeerka NHS iyo Community Care Act 1990 (Xeerka Xanaanada Jaalliyadda 1990), Children Act 1989 (Xeerka Caruurta 1989) iyo Children (Scotland) Act 1995 (Xeerka Caruurta (Iskotishka) 1995), Waaxyada Adeegyada Bulshada/Waaxyada Shaqada Bulshada ee England, Wales iyo Scotland waxaa waajib ku ah inay qiimeeyaan baahida caruurta curyaamiinta ah. Ujeeddada laga lee-yahay xeerarkaan waxay tahay in lagaa kaalmeeyo bacdamaa aad tahay waalid iyo in lagaa caawiyo xanaanaynta cunuggaada. In kasta oo xeerarkaan lagu dabaqin Waqooyiga Ayrland, the Children (Northern Ireland) Order 1995 (Amarka (Waqooyiga Ayrland) ee Caruurta 1995) waxuu si wax ku ool ah u siinayaa caruurta curyaamiinta ah isla xuquuqda ah sida kuwaasi ka jiro dhammaan UK.

Bacdamaa aad tahay waalid, waxaad xaq u lee-dahay inaad soo waydiisato inay qiimeeyaan baahida cunuggaada Waaxda Adeegyada Bulshada/Waaxda Shaqada Bulshada/Hay'adda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada. Waxaad kale oo aad xaq u lee-dahay inaad soo waydiisato in naf-ahaantaada laguu qiimeeyo (fiiri Waalidka ama qiimaynta xanaaneeyaha).

Waa maxaay qiimaynta adeegyada bulshada?

Waxay qiimaynta tahay wajiga koowaad ee lagu ogaanaayo caawinaadda aad uga baahan tahay Adeegyada Bulshada. Hawlwadeen Bulsho, oo laga yaabo inuu ka socdo Kooxda Caruurta Curyaaminta ah (haddii Waaxda Adeegyada Bulshada Deegaankaaga/Waaxda Shaqada/Hay'adda Caafimaadka iyo Bulshada ay midkood lee-yahay) waxay qabanayaan qiimayntaan waxayna abaabulayaan xanaano kasto iyo kaalmada lagu heshiiyo. Waxaa laga yaabaa in hawlwadeenka bulshada kugu soo booqdo guriga si oo kaaga la hadlo waxa ku saabsan kaalmada iyo adeegyada aad u malaynaysid inaad u baahan tahay. Isku day inaad u diyaar noqoto booqashada. Diiradda saar waxyaabaha ka caawini karaan adiga iyo cunuggaada. Waxay ahaan lahayd fikrad fiican inaad ka samaysato xauus qor oo aad qorotid su'aalo kasto oo aad u qabto.

Intii qiimaynta la sameynaayo waa inay hawlwadeenada bulshada kaa qayb geliyaan adiga, cunuggaada iyo qof kasto oo kale oo kaa caawinaayo xanaanayntooda. Waxay sababtaan tahay in adeegyada bulshada ay tixgeliyaan baahida gaarka ah ee cunuggaada ee dhinaca caafimaadkiisa, horumarkiisa, curyaanimadiisa, waxbarashadiisa, diintiisa, asalka jinsigiisa, hiddahiisa iyo asalka luqaddiisa, iyo ilaa heerka wax looga qabanaayo baahidaan xilligaan.

Waxaa waajib ku ah Maamulada Deegaanka inay siiyaan caruurta curyaamiinta ah qaar ka mid adeegyada. Waxaa kuwaani lagu bixiyaa sida uu qabo Chronically Sick and Disabled Person's Act (1970) (Xeerka Cudurka Joogtada ah iyo Qofka Curyaanka ah (1970)) ee England iyo Wales, laguna deray Sharciga Skootishka 1972 iyo Waqooyiga Ayrland 1978. Caruurta la siin karo adeegyada waxaa ku jiro:

- Gacansiinta la tabaan karo ee guriga;
- Waxyaabaha fududeeyo cuntada, ama kaalmaynta wax soo iibsiga, raadiyaha, television-ka bug-kaydinta, ama waxii la mid ah ee waqti-dhumiska;
- Fududaynta waqti-dhumiska ka ah guriga dibedda iyo ka caawinidda ku isticmaalidda waxyaabaha fududeeyo waxbarashada;
- Socdaalka iyo caawinaadaha kale;
- Waxyaabaha fududeeyo la-qabsiga guriga/curyaanimada;
- Fasaxyada;
- Cuntada;

- Telefoonka iyo qalabka taakulaynta.

Waxuu Maamulka Deegaanka siin karaa sida uu qabo Children Act adeegyo kale. Waxaa ku jiri karaan talosiin iyo tusmo-hagid, adeegyada dhar-dhaqidda iyo caawinaadda maaliyadda markii ay jiraan xaalado gaar ah.

Lacag bixinta tooska ah

Waxay maamulada deegaanka bixin karaan lacag toos ah intii ay bixin lahaayeen adeegyo si loo siiyo awood dadka curyaamiinta ah iyo xanaaneeyayaashooda inay ku iibsadaan adeegyada loo qiimeeyay oo loo baahnaa. Waxay waaliddiinta haatan xaq u lee-yahiin inay lacag ahaan u helaan intii ay u heli lahaayeen adeegyo si ay ugu iibsadaan si ay u caawinaan cunuggooda loo qiimeeyay baahida uu qabo.

Vouchers (Warqadaha wax laguu iibsado)

Waxay maamulada deegaanka England iyo Wales isticmaali karaan nidaamka warqadaha wax lagu iibsado (vouchers). Waxuu nidaamka run ahaan awood u siinayaa xanaaneeyayaasha iyo caruurta curyaamiinta ah inay helaan warqadaha wax lagu iibsado waqti gaaban markii lagu jiro biririfta nasashada.

Waqtiga xaadirka, si kastaba ha noqotee, waxay u muuqataa in maamulada deegaanka ay horumar ku sameeyeen nidaamka, xitaa in kastoo shuruucda oo ah inay sidaasi sameeyaan ay jirto.

Lacag ku bixinta adeegyada

Haddii laga dodo, sida uu qabo qaybta Chronically Sick and Disabled Person's Act (Xeerka Cudurka Joogtada ah iyo Qofka Curyaanka ah), adeegyada la siinaayo caruurta curyaamiinta ah ma lagu dallici karo kharash, in kasto oo qaar ka mid maamulada deegaanka ay ku dallacaan. Haddii lagugu soo dallaco kharash inaad ku bixisid adeegyadaan waxaad ka samayn kartaa cabasho. Adeegyada sida uu qabo Children Act waxaa la samayn karaa dallacaad haddii uu qooyska qaato amaahda canshuurta ama Gargaarka Lacageed (Income Support). Waxaa qooyska lagu dallacayaa intii uu cunugga ka gaaraayo 16 jir.

Waxay maamulada deegaanka kugu soo dallici karaa xisaab ay u malaynayaan inay ‘macquul‘ tahay laakin waa inay marka koowaad sameeyaan qiimaynta maaliyadeed. Waxay tani micnaheeda tahay inay ku waydin doonaan waxa uu la eg yahay dakhliga qooyska iyo kharashka ay isticmaalaan si ay uga shaqeeyaan inta aad ‘ sida macquulka ah’ aad awood u lee-dahay inaad ku bixisid kharashyada.

Haddii adiga ama cunuggaada aad awoodi karin inaad bixisaan, waa inaad ugu soo sheegtaa si degdeg ah Hawlwadeenka Bulshada/Waaxda Adeegyada Bulshada/Hay’adda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada. Inta lagu heshiiyay inaad ku biiriso waa in lagu saxa xisaabta aad awoodid inaad bixin kartid.

Diiwaanka caruurta curyaamiinta ah ee England iyo Wales

Si loo aqoonsado inta uu la eg yahay iyo heerka adeegyada loo baahan yahay si loo raaco waajibka guud ee ku aadan caruurta qabo curyaanimada, waxay maamulada deegaanka ku xafidayaan diiwaanka caruurta curyaamiinta ah.Waxuu hawlwadeenka bulshada kuu sheegayaa waxa ka dhaco aaggaaga. Ma u baahnid inaad cunuggaada diiwan gelisid, iyo haddii aadan diiwaan gelin, micnaheedu ma aha inaadan helayn wax adeegyo ah.

Si kasataba ha noqotee, diiwaangelinta waxay ka caawini kartaa qorshaha maamulka deegaanka iyo hay’adaha kale heerka saxa ah iyo isku dhafka adeegyada ee aaggaaga waxaana loo isticmaali karaa in lagugu siiyo wararka ku saabsan kaalmada iyo adeegyada.

Haddii aadan ku faraxsanayn

Haddii aadan ku faraxsanayn sida loo sameeyay qiimaynta, waxa ka soo baxay qiimaynta ama xisaabta lagugu soo dallacay waad ka soo caban kartaa. Waa inay dhammaan

maamulada deegaanka lee-yahiin habsocodsiinta cabashooyinka. Kala soo xiriir Waaxda Adeegyada Bulshada/Waaxda Shaqada Bulshada/Hay'adda Adeegyada Bulshada waxaana waydiisataa inaad la hadashid qofka wax ka qabto cabashooyinka. Haddii aad meelna ka helin u soo qor Agaasimaha Adeegyada Caruurta, Agaasimaha Shaqada Bulshada ee Scotland, ama la soo xiriir la-taliyahaada deegaanka iyo wakiilkaaga oo aad ku lee-dahay Xukuumadda ee heer qaran iyo UK. Haddii aad weli ku qanacsanayn, waxaa u soo caban kartaa Guddiga madaxabanaan ee ku habboon:

Adeegyada Guud ahaan Madaxbanaan ee Wales

1 Ffordd yr Hen Gae, Pencoed, Bridgend CF35 5LJ Tel: 01656 641150 Fax: 01656 673279 e-mail: enquiries@ombudsman-wales.org Shabakadda internet-ka: http://www.ombudsman-wales.org Shabakadda internet-ka: http://www.ombudsman-cymru.org

Guddiga madaxbanaan ee Xukuumadda (England)

Waxaa jiraan England Guddiyo Madaxbanaan. Mid kasta oo ka mid ah waxuu wax ka qabtaa qaybaha kala duwan ee dalka. Si looga helo faahfaahinada midka ku yaal aaggaaga, kala soo xiriir: Tel: 0845 602 1983 Shabakadda internet-ka: http://www.lgo.org.uk

Adeegyada Guud ahaan Madaxbanaan (Ombudsman) ee Skotishka

Freepost EH641, Edinburgh EH3 0BR Tel: 0870 011 5378 Shabakadda internet-ka: http://www.scottishombudsman.org.uk

Adeegyada Guud ahaan Madaxbanaan ee Waqooyiga Ayralnd

Freepost BEL 1478, Belfast BT1 6BR Tel: 0800 34 34 24 Shabakadda internet-ka: http://www.ni-ombudsman.org.uk

Xanaanada Nasashada

Waxay mar mar qooysaska leh caruurta curyaanka ah iyo/ama qabo xalaad caafimaad darro ka faa'iidaystaan inay helaan biririf gaaban. Qaadashada biririfta oo aad ka qaadanaysid xanaanaynta cunuggaada ma aha inaad ku guul-darraysatay ama si in loo yiraahdo ma xanaanaysid. Biririf la'aanta mar marka ah waxay u muuqataa inaad ku daalaysid ama xitaa ku fiicnaanayn. Way sii fudud tahay haddii aad u haysan lahayd xoogaa waqti ah oo aad ku samaysato waxyaabo oo adan samayn karin intii aad daba joogto cunuggaada. Waxuu cunuggaada xitaa ka faa'iidaysan karaa is-beddelka muuqaalka, inuu ka qaato biririf, la xiriiro dad kale iyo inuu yeesho waay-aragnimo cusub. Waxay kale kuu fududaynaysaa naftaada haddii aad ugu soo tagto qof cunuggaada, haddii ay isticmaali jireen inay sidaasi dhacdo mar mar.

Waxay dad badan maareeyaan inay ka qaataan biririf xanaanaynta iyaga oo coodsanaayo xubnaha kale ee qooyska, saaxibada ama dadka ay jaarka yahiin inay xilkaa ka qabtaan waqti ka waqti . Si kastaba ha noqotee, waxaa loo baahan karaa qabanqaabo ka sii badan oo caadi ah oo aan ku xirnayn dad kale oo la heli karo oona doonaayo inay kaa caawiyaan markii aad u baahan tahay. Waxay Takhatarka Guud ama hawlwadeenka bulsho kuu qabanqaabin karaan xanaanaynta nasashada (tusaale ahaan, xanaanada caadiga ah ee cunuggaada intii aad qaadanaysid biririfta), ama waxaad awood u lee-dahay inaad qabanqaabisid oo aadna ku bixisid lacag si gaar ah. Waxaa jiraan noocyo kala duwan ee ah xanaanada nasashada. Waxaad dooranaysid waxay ku xiran tahay baahida cunuggaada iyo waxa loo heli karo deegaan ahaan.

Xanaanada guriga

Waxaa ku jiraan adeegyada ilaalinta/haynta, oo lagu siinaayo qof ilaaliyo ama 'maanka ku haayo', iyo nidaamyada xanaanada la joogista, ee lagu bixiyo noocyo kala duwan guriga, oo ay ku jirto ilaalinta.

Xanaano maalimeedka markii laga maqan yahay guriga

Waxaa ku jiro meelaha xanaanada caruurta, meelaha lagu ciyaarsiiyo, kooxaha fursadda, dugsiyada xanaanaynta caruurta iyo fasallada ee dugsiyada caruurta aan gaarin da'da dugsiga sidaasi oo kalena waxaa jiraan xerooyinka caruurta iyo qooyska. Waxaa kale jiraan dugsiyo dibedda ah iyo naadiyada dhammaadka toddobaadka, iyo dugsiyada inta lagu jiro fasaxyada, helitaanka nidaamyada ciyaarta.

Biririfta meelaha la deggan yahay

Waxaa ku jiraan guryo la dego, unugyada isbitaalka iyo meelaha waayeelka lagu haayo.

Nidaamyada isku xirka qooyska

Halka oo cunuggaada u la joogaayo qooys kale si joogto ah ama mar mar.

Fasaxyada

Waxaa ku jiraan xarumaha dadka qabo curyaanimada iyo/ama xaalad caafimaad darro iyo dejinta halka caruurta loogu samaynaayo soo dhowayn.

Caafimaadka

Waxuu cunuggaada lee-yahay isla xuquuqda loo lee-yahay adeegyada caafimaadka sida qof kasto oo kale. Takhtarka Guud ama isbitaal ma siinayaan oo keliya daaweyn, waxaa xitaa siinayan warar, talosiin iyo kaalmo. Waxaa kale loo gudbinayaa adeegyada kale ee baaxadda leh ee ah daawaynta, xanaanaynta caruurta.

Waxaa adeegyadaan ku jiri karaan:

- Kaalinta Caruurta Jaalliyaddan - si loogu caawiyo waxqabadka wax ku oolka ah oo looga qaybgelinaayo in lagu kaaliyo cunugga markii uu joogo guriga, tusaale ahaan, dhar ka beddelidda, cirbad-durista;

- Booqadka Caafimaadka - kuu sheegidda siyaabaha la qabsashada xanaanaynta cunuggaada iyo in lagu siiyo wararka iyo talosiinta dhibaatooyinka maalin ka maalin;

- Daawaynta Hawlqabadka - in lagugu kaalmeeyo inaad ku caawinto cunuggaada inuu maareeyo waxqabadyada maalimeedka, sida labisashada, dhaqista iyo tegidda suuliga. Waxay kale oo ay siin karaan talada ku saabsan-iyo mar mar in laguu qabanqaabiyo in lagu siiyo -caawinaadda degdegga, qalabka iyo la qabsashada gurigaada si aad nafta si aad ah ugu fududayso iyo inaad horay ugu dhigto madaxbanaanida cunuggaada si sax ah iyo dhaqdhaqaaqiisa;

- Jimicsi ku daaweeyaha- waxuu siinayaa daawaynta iyo talo si oo uga caawiyo xanuunka iyo inuu u kordhiyo dhaqdhaqaaqa. Waxuu kale oo ku siin karaa talo, tusaale ahaan, waxa ku saabsan u qaadista saxda ah cunuggaada;

- Kaalinta Daawaynta maskaxda- waxay ku siinaysaa talo haddii cunuggaada uu qabo dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda iyo mar mar waxay ku siinaysaa daawaynta cunugga;

- Takhtarka ilkaha Jaalliyadda ama Kaalinta Ilkaha;

- Hadal daaweeyaha- waxuu caawinayaa caruurta dhibaatooyinka ku qabo hadalka, luqadda ama is-gaarsiinta;

- La-taliyaha kaadi-ceshashada- waxuu kaa siinayaa talo haddii cunuggaada uusan ceshan Karin kaadida;

- Xarunta Horumarinta Cunugga ama Unugga - si loo qiimeeyo baahida horumarineed ee cunuggaada iyo in la abaabulo daawayn ama adeegyo haddii ay habboon tahay;

- Gaari caruurta ama kursiga lagu socdo

- nappies ama waxyaabaha looga celiyo kaadida/saxarada - haddii oo cunugga ceshan karin kaadida sababta oo ah inuu curyaan yahay.

Isku day inaad dulqaadatid laakin aad ku adkaysid haddii aad u baahan tahay soo gudbin Takhtarka Guud ee cunugga ama isbitaalka takhasuska u leh adeegyada kale ee caafimaad. Caawinaadda dheeriga ah waxay sameyn kartaa beddelaad wayn. Haddii aad dareesan tahay inaysan meelna ku geeynayn, ama uu Takhtarkaaga Guud uusan jeclayn baahidaada, waxaad ka fiirsan kartaa inaad iska beddeshid Takhtarka Guud.

Haddii aadan ku faraxsanayn

Haddii aad weli ku faraxsanayn waa inaad si qoraal ah ugu soo cabataa adeegga aad ku qabto dhibaatooyika. Haddii arrinta aan weli la saxin waa inaad la soo hadasha xarunta talosiinta deegaanka sida Xafiiska Talosiinta Muwaadaniinta oo kaaga la hadlaayo tilaabta xigto oo qaadi kartid.

Ugu dambaynta, waxaa jiro Guddi Madaxbanaan oo dib u eegi karo arrintaada. Haddii aad ku nooshahay Wales, Scotland ama Waqooyiga Ayrland la soo xiriir Adeegyada Madaxbanaan ee horey loo soo qorey. Waxii England ah kala xiriiri faahfahinada sida soo socoto:

Guddiga madaxabanaan iyo Adeegga Caafimaadka (England)

Millbank Tower, Millbank, London SW1P 4QP Tel: 0845 015 4033 Shabakadda internet-ka: http://www.ombudsman.org.uk

Cudurada Dhifka ah

Waxaa lagu qiyaasay ilaa iyo afar milyan caruurta iyo dadka qaangaarka ah ee qabo cudurada dhifka ah ee UK. Waxay waaliddiin badani, ee la ogaaday inay qabaan xaalad dhif ah waxay noqon karaan kuwo keli ah iyo la kulmo waay-arag welwel leh.

Waaliddiinta ay caruurtooda qabaan cudurada dhifka ah waxaa laga yaabaa inaysan ku helin si degdeg ah wararka ku saabsan xaaladda, daawaynta ama ogaanshaha cudurka. Waxaa dhici karto inay ugu horayso takhtarka cunuggaada uu la kulmo xaaladdaan garka ah. Mar mar waxaa qooysaska loo sheegaa inay yihiin kuwa keliya ay taabteen cudurada dhifka ah. Waxay qooysas badan ku bixiyaan waqti badan si ay u helaan warar- waxay ka raadiyaan internet-ka si ay u helaan wax intaa ka sii badan. Mar mar, si kastaba ha noqotee, wararka internet-ka waxay noqon karaan kuwo wax ka soo qaad lahayn, aan waxba caawinayn ama sax ah. Xasuuso haddii uu cunuggaada qabo cudurka dhifka ah, in gacata lagu haayo caawinaad. Waxay Contact a Family awood u lee-dahay inay ku siiso wararka ku saabsan xaaladda waxayna ka caawini kartaa qooysaska inay la xiriiraan kuwo kale oo caruurtooda qabo isla xaaladdaan. Waa wax aad qiimo u leh in lays la qaybsado waayo-aragnimada iyo wararka waaliddiinta kale.

Xanaanaynta cunugga qabo cudur dhif ah waxay mar mar keeni kartaa culaysyo dheeri ah oo ay qooysaska kale oo ay taabteen xaalado aad caadi u ah aysan soo wajihin. Waxay waaliddiin badan ku soo warbixiyaan in xirfadlayaasha ay la kulmaan inaysan maqlin ama aysan fahmayn cudurka cunuggooda.

Waxay qooysas badan ku bixiyaan waqti badan si ay ugu micneeyaan takhaatiirta, kuwa ilkaha, daaweeyayaasha iyo tirooyin ah xirfadlayaal kale oo ay kala xiriiraan waxa ku saabsan cudurka dhifka ah iyo sida uu u taabanaayo cunuggooda. Waxaa sii dheer, helitaanka adeegyada iyo gargaarka lacageed inay qaadaan karaan waqti dheer bacdamaa ay hay'adaha aysan ogayn xaaladda iyo sida ay u taabanayso cunugga. Si kastaba ha noqotee, waxaa jiraan kooxo kaalmo bixiya oo tiro badan ee xaaladaha dhifka ah oo laga heli karo inay ku caawiyaan waaliddiinta waxayna awoodaan inay talo ka bixiyaan sida ugu fiican ee loogu heli karo caawinaad cunuggaada. Ka soo wac khadka caawinaadda ee bilaashka ah Contact a Family si aad uga heshid warar dheeri ah.

Waxay Contact a Family qabtaa adeegga horumarinta ee ka caawiyo waaliddiinta inay samaystaan kooxaha kaalmada qooysaska oo ay u taabteen si shakhsi ah cudurada dhifka ah. Sidaasi darted haddii aad u malaynaysid inaysan jirin kooxda kaalmada ee lug ku leh xaaladda cunuggaada uu ku jiro oo aadna danaynaysid inaad midkood bilaabdid, la soo xiriir.

Ku xirnaanshaha

Waxay waaliddiin badan inoo sheegaan inay jecel yahiin inay la hadlaan qooysas kale ee leh caruur qabto isla curyaanimadaasi ama xaalad caafimaad darro sida cunuggooda oo kale. Haddii sidaan aad danaynaysid, waxay kooxda kaalmada ee xaaladda cunuggaada way kugu xiri karaan qoysaskaas. Haddii aysan jirin koox, nagala soo xiriir khadkeena- waxay La-taliyayaasha Waaliddiinta kugu xiri karaan waaliddiinta kale mid-mid.

Haddii aad geli kartid internet-ka waxaa isku dayi kartaa oo kale inaad ku soo xiranto shabakadda Contact a Family oo ah:

http://www.makingcontact.org/

Waxay kuugu xiraysaa si sugan inaad kula xiriirto qooysaska uu taabtay xaaladda gaarka ah meel kasto ay ku nool yahiin. Waxaad isku diiwaan gelin kartaa si bilaash ah, waxaadna siin kartaa warar aad u badan ama aad u yar ee ku saabsan naftaada sida aad u doonayso.

Fadlan la soco in waqtiga xaadirka in adeeggaan lagu heli karo keliya Ingiriisi qoran. Waxii warar dheeri ah ee ku saabsan sida uu u shaqeeyo adeeggaan iyo sida layskaga diiwaan geliyo haddii aadan geli karin internet-ka, fadlan la soo xiriiri khadka caawinaadda.

Xanaanaynta Caruurta

Waxay Xanaanaynta Caruurta ka ciyaarta qayb muhiim ah nolosha qooyska. Waxaa dhici karto inaad u baahato si aad u shaqayn kartid, wax u baran kartid ama aad wax u samaysan kartid naf-ahaantaada. Waxay qooysaska leh caruurta curyaamiinta ah inta badan og-yihiin in helidda iyo diyaarinta xanaanaynta caruurta ay xadidan tahay. Waxay qooysaska qaarkood isticmaalaan xanaanaynta caruurta aan rasmiga ahayn, sida xubnaha kale ee qooyska, saaxibo ama jiiraanka. Waxaa jiraan waqtiyo oo aad ogaanaysid inaad u baahan tahay inaad samaysid qabanqaabooyin aad rasmi u ah waxaana u baahan kartaa inaad isticmaashid in ka badan hal adeeg xanaanayn ee caruurta. Waxay aagagga deegaanka qaarkood qabaan adeegyo gaar u ah qooysaska leh caruurta curyaamiinta ah. Waxay kuwo kale lahaan karaan mashruucyo ka kaalmayso caruurta qabto baahida dheeriga ah si ay u helaan adeegyada xanaanaynta caruurta. Wax barashada sanadaha horey ee England waxay ku diwaan gelisan yihiin waxaana maamula OFSTED, Skotland-na Kormeeraha Waxbarashada ee Boqortooyada, Waqooyiga Ayrland-na Waaxda Waxbarashada waxayna Wales ka diiwan gelisan yihiin ESTYN.

Maan ku hayayaasha caruurta

Waxay maan ku hayayaasha caruurta ku sameeyaan xanaanaynta waqti buuxo iyo waqti dhiman, ciyaaro iyo fursadaha waxbarashada caruurta, inta badan guriga maan ku hayayaasha caruurta. Waxay maan ku hayayaasha caruurta yahiin kuwo iskood u shaqaysto waxayna ahaan karaan kuwo dabacsan saacadaha ay shaqeeyaan, iyaga oo bixinaayo subaxa hore, galbahii iyo dhammaadka toddobaadka.

Kaalinta xanaanada caruurta

Waxay kaalinta xannaanada caruurta tahay midda ugu horayso caruurta 5 jirka ah inay ku ciyaaraan waxna ku bartaan jawi kooxeed, waxayna dhiibaan meelo waqti buuxo ama waqti dhiman. Kaalmaha qaarkood waxay kale oo ay sameeyaan xanaanaynta caruurta waawayn ka hor iyo ka dib sacadaha dugsiga iyo inta lagu jiro fasaxyada dugsiga.

Xanaanada dibedda ka ah dugsiga

Xanaanada dibedda ka ah dugsiga (oo inta badan loo yaqaan naadiyada caruurta ama naadiyada dibedda ka ah dugsiga) ee caruurta gaartay da'da dugsiyada ee ka hor ama ka dib dugsiga iyo/ama inta lagu jiro fasaxyada dugsiga. Waxay inta badan uu saldhigooda ku salaysan yahay ama u dhow yahay dhismooyinka dugsiga.

Da'da ka hor dugsiyada

Da'da ka horayso dugsiyada (oo mar mar loo yaqaan kooxaha ciyaarta) waxaa lagu bixiyaa xanaanada waqtiga dhiman iyo waxbarashada caruurta oo ay da'dooda u dhexayso 2 ½ iyo 5. Waxay kalmada shaqeeyaan qiyaastii labo saacadood laakin qaar waxaa la heli karaa waqtiyo ka sii dheer.

Nidaamyada ciyaarta fasaxa

Nidaamyada ciyaarta fasaxyada waxay shaqeeyaan inta lagu jiro fasaxa dugsiga ee caruurta gaartay da'da dugsiga, si loogu sameeyo jawi u leh nabadgelyo iyo soo jiidasho caruurta inay ku ciyaaraan iyo inay ku maaweelaystaan. Waxaa qaar lagu bixiyaa waqti dhiman ama waqti buuxo oo ah xanaanayn.

Dadka caruurta looga tagto

Waxay dadka looga tagto caruurta xananeeyaan caruurta qooyska ayagoo guriga kula noola ama si maalinle ah. Waqtiga xaadirka ma loo baahno in la diiwaan geliyo dadka looga tagto caruurta.

Waxaa jiraan adeegyo kale ee loogu talo galay caruurta iyo qooysaska- tusaale ahaan, kooxda waalidka/xanaaneeyaha & socod baradka, xarumaha qooyska, kaydka alaabta caruurta ku ciyaarto iyo meelaha lagu ciyaarsiiyo caruurta wax cusub raadiska ah. Waxuu

Booqadlaha Caafimaadka kaa caawini karaa iyo/ama hawlwadeenka bulshada inay ku la socodsiiyaan adeegyada kale ee habboon. Waxaa kale oo qiimo leh in la su'aalo waaliddiinta kale ee kooxaha kaalmada adeegyada ay u isticmaalaan xanaanada caruurta.

Xulashada adeegga saxa ah xanaanada caruurta waa u muhiim cunuggaada. Waxaad u baahan tahay inaad ku kalsoonaato in cunuggaada ku sugan yahay nabadgelyo, badbaado iyo farxad. Waa inaad isla eegtaa maamulka deegaanka oo looga baahan yahay in adeegyada xanaanada caruurta laga diiwaan geliyo lana soo kormeero sanad kasto.

Waxaa warar faahfaahsan ee ku saabsan xulashooyinka xanaanada caruurta iyo sida looga heli karo Adeegga Wararka Xanaanada Caruurta deegaaneed. Haddii aad ku nooshahay Wales, England ama Scotland, waaxuu Khadka bilaashka ah ee Isku Xirka Xanaanada Caruurta kula xiriirinayaa adeegga wararka ee deegaankaaga Tel: 08000 96 02 96 Shabakadda internet-ka: http://www.childcarelink.gov.uk Haddii aad ku nooshahay Waqooyiga Ayrland kala xiriir waxii warar dheeri ah Hay'adda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Jaalliyadda.

Waxbarashada

Bacdamaa aad tahay waalidka cunugga qabo baahida gaarka ah ee waxbarashada, waxay waxbarashada noqon kartaa mid ka mid ah welwelkaaga ugu wayn. Waxay dabcan waaliddiinta ka qabaan welwelo iyo kacsanaan ku saabsan dugsiyeenta, ay ku jiraan in dugsiyo gaar ah ama in waxbarashada muhiimka ah inay yahiin xulashooyinka ugu fiican.

The Special Educational Needs (SEN) and Disability Act 2001 (Waxbarashada Baahida Gaarka ah (SEN) iyo Xeerka Curyaanimada 2001) waxay qayaxayaan is-beddelada waxbarashada ee caruurta qabto SEN ee England iyo Wales. Waxuu kale u furayaa waxbarashada in lagu soo daro Xeerka Takooridda Curyaanimada, isaga oo uga dhigaayo sharci darro bixiyayaasha waxbarashada inay kala takooraan dugsilayda curyaamiinta ah, ardayda iyo dadka qaangaarka ah ee wax baranaayo. The Special Educational Needs and Disability (Northern Ireland) Order 2005 (Amarka Baahida waxbarashada Gaarka ah (Waqooyiga Ayrland) ee 2005) waxuu ku sii adkeeyay sharciga SEN dugsiyada iyo waxuuna sii dheereeyay qaybaha waxbarashada sare markii ugu horaysay

Waxbarashada England, Wales iyo Waqooyiga Ayrland

Haddii uu cunuggaada qabo baahida waxbarashada gaarka ah (SEN) iyada/isaga waxuu u baahan karaa caawinaad dheeri ah iyo kaalmo uu ku helo waxa ugu fiican habka waxbarashada. Kuwa qabo baahida waxbarashada gaarka ah oo aysan heli Karin sanadaha hore ama aysan ilaha dhaqaale ee dugsiga u fasaxayn, waxuu Maamulka Waxbarashada deegaanka (LEA) ama maktabadda ee Waqooyiga Ayrland, ku samayn karaan qiimayn si loogu caawiyo inay ka gaaraan go'aan in loo baahan yahay iyo in kale tilaabo dheeri ah in laga qaado. Waa inuu maamulka ku habboon tixgeliyaa qiimaynta ilaa uu maamulka filaayo inaan loo baahnayn ama haddii uu cunuggaada soo maray qiimayn lixdii bilood ee la soo dhaafay. Waxii ka soo baxo waxaa lagu soo saarayaa dokumenti, loo yaqano Caddaynta Baahida Waxbarashada Gaarka ah, oo qayaxayo sida wax looga qabanaayo. Habsocodsiinta oo dhan, laga soo bilaabo tixgelinta ah in ay qiimaynta laga maarmaan tahay iyo inkale, ilaa laga soo saaraayo Caddaynta ka ma dambaysta ah ma qaadanaysoo in ka badan 26 toddobaad. Waqooyiga Ayrland, dherirka waqtiga waa 18 toddobaad.

England iyo Wales waxay qabaan Habkooda Waxqabad ee Baahida Waxbarashada Gaarka ah, sidoo kale Waqooyiga Ayrland, ee qabo maamulo shuruuc gooni u ah.

Caddaymaha England iyo Wales

Wajiyada qiimaynta ee soo socdo waxaa lagu sameeyay Habka Waxbarashada ee Baahida Waxbarashada Gaarka ah oo faahfaahinaayo mabaadiida ugu muhimsan ee lagu garanaayo laguna qiimaynaayo sen.

Qiimaynta Waxbarasho ee caruurta ka yar 2

Haddii u cunuggaada haysto xaalad gaar ah ama dhibaato wayn ee caafimaad oo keentay welwel da'diisii hore, waxaa loo soo gudbin karaa LEA si loo qiimeeyo. Ma u baahno qiimayntaan inay raacdo hababsocodsiinta sharciga ah ee lagu dhaqo caruurta da'dooda ka wayn yahay 2.

Qiimaynta Waxbarasho ee caruurta aan gaarin da'da dugsiga qasabka ah ayna ka wayn yihiin 2

- **Tilaabada Sanadaha Hore** – waxay sidaani dhacdaa markii la dareemo in cunugga u baahan yahay kaalmo dheeri ah ee lagu daraayo sida qayb ka mid ah manhajka caadi ahaan loo bixiyo. Waxay tilaabadaan noqonaysaa soo dhexgelid ay ku heshiiyeen SENCO (Xiriiriyaha Baahida Waxbarashada Gaarka ah) iyo baraha cunugga oo la tashtay waaliddiinta cunugga.

- **Tilaabada Sanadaha Hore oo Saa'idka ah-** Waxuu wejigaan yahay markii adeegyada kalmaada dibedda ama talosiin dheeri ah loo dalbado in lagu caawiyo horumarka cunugga.

- **Soo waydiisashada qiimaynta sharciyeed**-Wajiyada kor ku xusan ma kaafi karaan caruurta qaarkood si wax looga qabto baahidooda dheeriga ah. Waa wejigaan in lagu soo waydiisto qiimaynta sharciyeed in la samayn karo. Waxaa soo waydiin karo adiga bacdamaa aad tahay waalid, ama waxaa soo waydiin karo mid ka mid ah xirfadlayaasha ee xiriirka la leh cunuggaada.

Qiimaynta waxbarasho ee dhigashada dugsiga ee caruurta

Waxaa caruurta qaarkood horay loogu aqoonsaday baahida waxbarashada gaarka ah ka hor inta lagu soo qorin dugsiga- kuwa kale u ma aha sidaas arrinta. Waxay wajiyada la mid yahiin cunug dhiganaayo sanadaha hore.

- **Tilaabta uu qaadaayo Dugsiga-**waxuu SENCO soo aqoonsanayaa inuu cunugga baahi u qabo SEN oo u baahan in kaalmayn dheeri ah ama ka duwan kuwa lagu siiyo manhajka guud ahaan.

- **Tilaabada Saa'idka ah ee Dugsiga** – Waxay sidaan ka soo baxaysaa coodsiga caawinaadda laga helaayo adeegyada dibedda ama caawinaadda takhasuska leh ee wax looga qabanaayo baahida cunuggaa.

- **Soo waydiinta Qiimaynta Sharciga ah** – Halkii loo malaynaayo inuu cunugga weli qabo baahida micnaawiga ah oo aan wax looga qaban karin tilaabooyinka wajiyadii hore, waxuu dugsiga soo waydiisan karaa qiimaynta sharciyeed ee cunugga. Mar kale waxay waaliddiinta xitaa u lee-yahiin xaq inay soo waydiistaan qiimaynta sharciyeed ee cunuggooda.

Waxuu LEA ku qasban yahay inuu la soo socodsiiyo waaliddiinta inay ama inaysan go'aansadeen qiimeeynta. Maamulka waxbarashada Deegaanka waa inuu ku siiyaa 29 maalin oo ogaysiin ah ka hor inta la bilaabin qiimaynta. Waxaa waqtigaan lagu awood siinayaa waaliddiinta inay kaga soo jawaabaan wararka iyo aragtiyada loogu soo deraayo sida qayb ka mid ah qiimaynta.

Waxaa inta badan ku jiro qiimaynta warbixinada dugsiga, Takhtarka Maskaxda ee Waxbarashada, takhtarka ama xirfadlaha caafimaadka iyo waaliddiinta.

Contact a Family waxay soo saartey labo warbixiye "**Special Educational Needs - England**" iyo **Special Educational Needs - Wales**" (oo lagu heli karo Welish) sidaasi oo kalena **Disability and Education Pack for England (Baakada Curyaanimada iyo Waxbarashada England)** oo looga soo dalban karo lacag la'aan khadkeena bilaashka ah ama waxaa laga soo saaran karaa shabakaddeena internet-ka.

Haddii uu waalidka ku faraxsanayn caddaynta cunugga, uusana awoodin inuu la xalliyo LEA, markaa waxay rabi karaan inay ka qaataan racfaan. The Special Educational Needs and Disability Tribunal (SENDIST) (Maxkamadda Baahida Waxbarashada Gaarka ah iyo Curyaanimada) waxay soo saartaa labo warqadood ee loogu magac daray: Special Educational Needs - How to Appeal' and 'Disability Discrimination in Schools ('Baahida Waxbarashada Gaarka ah- Sida looga qaato Racfaan' iyo 'u Takooridda Curyaanimada ee Dusiga)'- Sida aad u soo Coodsanaysid, sidaasi oo kalena waxaa jiro cajalka muuqaalka (video) lagu magacaabo : 'Xaqqa loo lee-yahay In lagu Maqlo'. The Special Educational Needs Tribunal for Wales (SENTW) (Maxkamadda Baahida Waxbarashada ee Wales) waxay kale soo saartaa qoraalka labadaan warqadood ee lagu dhaqan geliyo qodobbada ee Wales.

SENDIST, Procession House, 55 Ludgate Hill, London EC4M 7SW Tel: 0870 241 2555 SEN Khadka caawinaadda Tel: 0870 606 5750 Khadka Takooridda e-mail: tribunalqueries@sendist.gsi.gov.uk Shabakadda internet-ka: http://www.sendist.gov.uk

SENTW, Unit 32, Ddole Road Enterprise Park, Llandrindod Wells LD1 6PF Tel: (01597) 829800 Khadka caawinaadda e-mail: tribunalenquiries@wales.gsi.gov.uk Shabakadda internet-ka: http://www.sentw.gov.uk

Waxaa jiraan ururo badan ee loo abuuray inay ka caawiyaan waaliddiinta dhibaatooyinka waxbarashada caruurtooda. Fadlan kala soo xiriir khadka caawinaadda waxii faahfaahin dheeri ah.

Maamulo badan ee Waxbarashada Deegaanka ee England waxay qabaan Nidaamka Lamaanshaha Waalidka, kala soo xiriir khadka caawinaadda ee LEA ama Contact a Family waxii faahfaahin dheeri ah. Degmo kasto ee Wales waxuu lee-yahay nidaam la mid ah, ee uu bixiyo ururka iskaa wax u qabso ee madaxabanaan. Kala soo xiriir LEA ama xafiiska Contact a Family ee Wales (Ka fiiri waxii warar dheeri ah Contact a Family)

Ka tegidda Dugsiga

England iyo Wales, inta lagu jiro sanadka 9aad (ama markii cunuggaado uu gaaro 14) waa in dib u eegidda sanadka ee caddaynta lagu soo daraa samaynta Qorshaha Kala Guurka si loo diyaariyo waxbarashada ka damabayso 16.

Haddii aad ku nooshahay England waa in dib u eegidda lagu soo biiriyaa Adeegga Connexions ee lagu siiyoo tusmo-hagidda dadka dhallinta yar waxtiga oo ay u kala guuriyaan nolosha qaangaarka. Haddii aad ku nooshahay Wales, waa inay Xanaaneeyayaasha Wales ku soo darsamaan.

Waa la fahmi karaa, waxay waaliddiin badan ka welwelaan waxa ku saabsan mustaqbalka cunuggooda ka dib markii laga baxo waxbarashada waqtiga buuxo

Waxaa jiraan si kastaba ha noqotee, colleges- badan ee waxbarashada dheeriga ah oo awood u leh inay oggolaadaan ardayda curyaanka ah fasaladooda muhiimka ah. Waxaa kale oo jiraan fasallada gaarka ah oo looga dan lee-yahay inay fududeeyaan kala guurka dugsiga ilaa waxbarashada dheeriga ah ama shaqada. Fasallada qaarkood waxay diiradda saaraan sida ay u caawini lahaayeen dadka dhallinta yar nolosha madaxbanaan, ay ku jiraan maaraynta tabobaridda guriga, xiriirka shakhsiyadeed iyo isticmaalka waqtiga raaxaysiga.

Waa inuu dib u eegid la fahmi karo ee baahida qofka dhallinta yar ku jiraa Qorshaha Kala Guurka markii ay u soo dhowaanayaan raganimada. Waa inuu ka xagga maraa waxbarashada iyo baahida tabobaridda. Waalidiinta, dadka dhallinta yar, iyo qareenadooda u dodo iyo hawlwadeenada xirfadaha leh ee si ku jiro waa inay ka so wada qaybgalaan habka lagu socodsiinaayo. Waa in Qorshaha Kala Guurka dib loo eegaa sanad kasto. Waxay Contact a Family soo saartaa warqad-xaqiiqo-doon ah ee lagu magacaabo'**Transition in England and Wales' (Kala Guurka England iyo Wales)**

Waxbarashada ee Scotland

Waxaa waqti xaadirka ku socdo habka waxbarashada Scotland is-beddel wayn. Waxaa lagu beddelayaa habka haatan jiro ee baahida waxbarashada gaarka ah ee Education (Additional Support for Learning) (Scotland) Act 2004 (Waxbarasho cusub (Kaalmada Dheeraadka ah ee Waxbarasho) Scotland Xeerka 2004), oo dhaqan gelaayo 14ka Nofembar 2005.

Waxaa Xeerka cusub lagu soo bandhigayaa ra'yiga ballaaran ee Baahida Kaalmada Dheeriga ah (ASN) waxayna loo sii fidinayaa xaqqa dheeriga ah ee lagu sii caawinaayo dugsilayda. Maamulada Waxbarashada waxaa saran waajib cusub si ay u soo ogaadaan iyo inay kaalmeeyaan dhammaan caruurta ka faa'iidaysan karto caawinaadda dheeriga ah ee waxbarashadooda. Waxay sidaan noqon kartaa sababta oo ah nooc kasto oo curyaanimo ah ama haddii ay qabaan dhibaatooyin bulsho, maskaxeed ama asluubeed, haddii si gaar ah u lee-yahiin hibo, uu Ingiriisiga u yahay luqaddooda labaad, ama la qash-qashaado ama ay la kulmeen tacsi.

Dugsilayda madaxa adag, dhibaatada leh ama qabo baahiyo isku dhafan una baahan adeegyo oo aysan iskood u bixin karin maamulka waxbarashada, tusaale ahaan, adeegyada daawaynta,waxaay xaq u yeelanayaan Xiriirka Kaalmada Qorshaha (CSP). Waxaa loola jeedaa Xiriirka Kaalmada Qorshaha in lagu hubiyo xiriirka aad u sii fiican ee adeegyada ee waxbarashada, caafimaadka iyo shaqada bulshada. Waxay waaliddiinta ugu qaadan karaan inay kaga doodaan Xiriirka Qorshayaasha Kaalmada habka maxkamadda cusub.

Waxaa jiri doono waqtiga kala guurka ee loogu guuraayo habka cusub ee caruurta iyo dadka dhallinta yar ee ku diiwan gashan Baahidooda degdegga ah ka hor biloowga Xeerka cusub. Waxuu maamulka waxbarashada waxuu u lee-yahay ilaa iyo 2 sanadood inuu kaga gaaro go'aan, qiimaynta soo socoto, in caruurta ku Diiwaan gashan Baahida ay u baahan yahiin Xiriirka Qorshaha Kaalmada. Inta lagu jiro waqtigaan heerka waqti xaadirka jiro ee kaalmo waa inuu sii jiraa. Halka laga go'aamiyay in Xirirka Qorshaha Kaalmada looga baahnayn, waxuu Xeerka cusub sugayaa in qodobbada haatan jiro sidooda loo hayo ilaa ugu yaraan 2 sanadood. Waxay caruurta qaarkood iyo dadka dhallinta yar ee ku Diiwaan-gashan Baahida waxay u noqon kartaa in heerka kaalmada ay ku helaan habka haatan jiro ee loo haaynaayo ilaa 4 sanadood laga soo bilaabo taariikhda ee la bilaabay Xeerka

Waxuu sharciga la dejiyay dhaqan gelayaa 14ka Nofembar 2005. Ilaa laga samaynaayo qabanqaabooyin wuu sii jiryaa.

Waxii warar dheeri ah waxaa laga heli karaa:

Waydiimaha, Adeegga Talosiinta ee Kaalmada waxbarasho ee Dheeriga ah ee Scotland

Tel: 0845 123 23 03 Shabakadda: http://www.enquire.org.uk

Ama Contact a Family Scotland (Ka fiiri warar dheeri ah Contact a Family)

Gargaarka lacageed

Habka gargaarka lacagta aad ayuu u dhib badan yahay. Dad badan ma garan karaan inay xaq u lee-yahiin inay soo coodsadaan. Waxaa dhammaan foomamka coodsiga laga heli karaa Khadka Soo waydiinta Gargaarada ee ah 0800 88 22 00.

Haddii aad qabtid su'aalo dheeri ah, la xiriir:

- Khadka caawinaadda ee Contact a Family: 0808 808 3555;
- Xafiiska Talosiinta Muwaadaniinta (Fiiri la soo xiriiridda waxtarka leh)
- Waxay ururadaan kaa caawini karaan talada ku saabsan gargaarada si loo hubiyo inaysan waxba ka dhumin, waxay kale oo ay kaa caawini karaan inaad soo buuxiso foomamka coodsiga. Waxaad Adeegyada Bulshada ee Deegaankaaga, Hay'adda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ama Waaxda Shaqada Bulshada lee-yahiin La-taliyaha Xaqqa Barwaaqaynta/La-taliyaha Gargaarada oo iyagan ku caawini karaan.

Haddii aadan hubin inaad xaq u lee-dahay gargaarka, si kastaba u soo dhammaystir foomka coodsiga, bacdamaa ay aad u adag tahay in inta badan gargaarada dib loogu celiyo taariikhda.

Gunno nololeedka Curyaanimada

Gargaarka ugu wayn ee caruurta curyaanka ah waa Gunno Nololeedka Curyaanimada (DLA) Waxay ka kooban tahay labo qaybood:

- Qaybta xanaanada ee caruurta u baahan taxadir dheeri ah ama in la kor joogo. Waxaa lagu bixiyaa seddax xisaab oo kala duwan oo ku xiran inta caawinaad ah ee cunugga u baahan yahay;
- Qaybta dhaqdhaqaaqa ee caruurta u baahan caawinaadda ah inay meel ku gaaraan. Waxaa lagu bixiyaa labo xisaabood oo kala duwan oo ku xiran dabeecadda oo ay lee-dahay dhibaatada dhaqdhaqaaqa.

Waxaa dhici karto in cunuggaada ku sifoobo midkood ama labaduba ee ah qaybahaan. Haddii cunuggaada la siiyo qaybta xanaanada xisaab dhexe ama xisaab sare waxaad kale oo xaq u yeelan kartaa Gunnada Xanaanada (CA) ee ah haynta cunuggaada.

Waxaa jiro foom lagu soo coodsado DLA ee caruurtta laguna magacaabo DLA1 aad ayuu ugu fudud yahay inay isticmaalaan waaliddiinta, sidaas darted iska hubi in lagu siiyay foomka saxa ah si aad uu buuxiso. Markii aad u soo coodsanayso gargaarka naf-ahaantaada ama cunuggaada waxaa aad muhiim u ah inaad ku soo darto warar aad u badan foomka inta aad awooddo.

Warar kasto oo uu soo bixiyo takhtarka waxay caawini karaan coodsigaada. Haddii aadan hubin waxa ku saabsan sida loo buuxinaayo, soo waydii Xafiiska Talosiinta Muwaadaniinta ama Khadka caawinaadda ee Contact a Family waxii talo ah.

Amaahda Canshuurta

Waxay tahay Amaahda Canshuurta Caruurta mid loogu talogalay qooysaska oo leh ugu yaraan hal cunug. Waxaa loo sameeyay quudinta aasaasiga ah ee qooyska (xisaabta lagu bixiyo aad ayay u saraysaa haddii aad lee-dahay hal cunug oo ka yar 1 sano), xisaabaha ee cunug kasto, iyo xisaabo dheeri ah ee caruurta la siiyo DLA.

Waxaa lagu bixin karaa Canshuurta Amaahda shaqada (WTC) haddii aad lee-dahay cunug (ka yar 16, ama ka yar 19 jir oo uu welina ku jiro waxbarashada waqti buuxo iyo adiga (ama lamaanahaada haddii aad mid lee-dahay) aad shaqaysaan ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii. Waxaa WTC la siin karaa dadka qaato lacag yar oo aan lahayn caruur: dadka

curyaanka ah ee shaqeeyo ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii, dadka ka wayn 50 oo waqti dhow u laabtay inay shaqeeyaan ka dib markii ay ilaa waqti qadanaayeen gargaaro iyo dadka ka wayn 25 jir ee shaqeeyo ugu yaraan 30 saacadood toddobaadkii.

Waxii warar dheeri ah ee ku saabsan amaahda canshuurta, fiiri warqaddeena "**Tusmo-hagiidda Amaahda Canshuurta"** (**The Tax Credits Guide)** (waxaa haatan lagu heli karaa Ingiriisi, Carabi, Faarsi, Mandariin iyo Soomaali) ama soo wac Khadka caawinaadda ee Contact a Family. Taa beddelkeeda waxaad la soo xiriiri kartaa Xafiiska Waydiimaha Canshuurta deegaankaaga.

Gargaarada kale iyo ilaaha caawinaadda maaliyadeed

Waxaad heli kartaa gargaarada dheeriga ah ee soo socdo:

- **Kaalmada Dakhliga** waa ujeeddada la tijaabiyay ee gargaarka lagu caawiyo shakhsiyaadka ama qooysaska oo dakhligooda hooseeyo kaydkooda lacageedna ka yar yahay £8,000;

- **Gargaarka Guriyeenta** (Dhimista Kirada ee Waqooyiga Ayrland) waxaa la siiyaa kuwa bixiyo kirada oona dakhligooda hooseeyo;

- **Gargaarka Canshuurta Golaha Deegaanka** (Dhimista Kirada ee Waqooyiga Ayrland) waxaa la siiyaa kuwa mas'uulka ka ah Canshuurta Golaha Deegaanka iyo kuwo dakhliga hoose;

- **Ka dhimista Canshuurta Golaha ee curyaanimada** haddii aad uga baahan tahay meel dheeri ah gurigaaga sababta oo ah curyaanimada cunuggaada.

Waxaad kale oo aad xaq u yeelan kartaa caawinaadda maaliyadeed ee ilaha kale, tusaale ahaan:

- **Deeqda Xanaanada Jaaliyadda ee Sanduuqa Bulshada** haddii lagu siiyo Gargaarka lacageed (Income Support) oo aad u baahan tahay inaad ku bixisid wax aadan awoodin inaad ka bixisid gargaarkaaga toddobaadka, sida waxyaabaha sariirta, dharka, dhaqidda, alaabta nabadgelyada ama kharashyada ku baxo soo booqashada cunug kaaga jiro isbitaal;

- **Deeqda laga bixiyo Sanduuqa Qooyska**. Waxaa lagu bixin karaa alaab gaar ah si lagaaga caawiyo culayska kaaga imaanaayo xanaanada maalin ka maalin ah ee cunugga ka yar 16 ee qabo curyaanimo xoog leh ama cudur daran, tusaale ahaan, qalabka dhaqidda, kharashyada gaadiidka (ay ku jiraan caawinaadda casharada gaari-wadidda), dhar gadashada iyo fasaxyada. Waxii warar dheeri ah, kala soo xiriir Family Fund, Tel. 0845 13045 42 e-mail: info@familyfund.org.uk

Waxii warar dheeri ah ee ku saabsan kaalmada maaliyadeed waxay Contact a family soo saartaa warqad-xaqiiqeed loogu magac daray "**Benefits, Tax Credits and other financial assistance**"

Fadlan ogaaw inay jiraan nidaamyo ka hortegaayo dadka aan xaqqa u lahayn inay ugu noolaadaa si joogto UK inay soo coodsadaan gargaaro qaarkood. Inaad soo coodsatid gargaaro adiga oo ku sugaan xaaladahaas waxay waxyeelayn karaan joogistaada UK. Waxay taa micnaheeda tahay in dad badan oo leh keliya xaqqa ah inay ku sii joogaan keliya UK si ku meel gaar ah, sida ardayda badankood iyo dadka booqashada ku imaanaayo, ma soo coodsan karaan gargaaro marnaba, xitaa haddii ay lee-yahiin cunug curyaan ah.

Haddii aadan hubin inaad xaq u lee-dahay inaad ugu noolaato Uk si joogto ah, waxaad ka soo wacdaa Khadka caawinaadda ee Contact a Family 0800 808 3555 waxii talosiin ah ka hor intaadan samayn.

Ciyaar, Raaxaysi iyo Madadaalo

Waxay dhammaan caruurta u baahan yahiin fursad ay ku ciyaaraan. Mar mar fursadaha ku salaysan ciyaarta jaalliyadda aad ayay ugu xadidan yahiin caruurta curyaanka ah. Si kastaba ha noqotee, xaaladda si tartiib ah ayay u soo hagaagaysaa waxayna ururo badan iyo shakhsiyaad uga shaqaynayaan si xoog leh inay sugaan fursado aad u badan in la helo. Waa muhiim, sababta oo ah in ciyaarta ay ka ciyaarayso doowr aad muhiim u ah horumarinta dhammaan caruurta, wax kasto uu la eg yahay awooddooda.

Haddii aad lee-dahay cunug curyaan ah iyo/ama ku jiro xaalad caafimaad darro, waxaad u baahan tahay inaad ka fikirto waxa ku saabsan nooca fursadaha ciyaarta uu cunuggaada danayn karo. Waxay noqon karaan laga soo bilaabo rabitaanka meel barxad ah ee u fududaynayso inuu ku la ciyaaro koox, barxadda koox-ciyaareedka ee ku ogaanshaha waxyaabo cusub ama nidaamka ciyaarta fasaxa, iyada oo loo isticmaalaayo mar mar naadiyada toddobaadlaha ah ama bug-kaydinta. Falaha kale ee ah in la tixgeliyo waxuu yahay in waxqabadka aad doonaysid in loo helo si loo siiyo fursadda ah inay ku soo darsamaan walaalihii. Tiro bada oo ah ururo waxay haatan bixinayaan ciyaar isku jirto si qooyska oo dhan uga qayb qaataan.

Ha yasin beeraha guud ee deegaanka iyo waxyaabaha fududaynta ee looga heli karo halkaa dhammaan caruurta. Waxay beero badan bilaabayaan inay ka faa'iidaystaan deeqaha dib u soo noolaynta sidaasi darteena waxay u si horumarayaan aagag cusub ee si aad ah looga heli karo ciyaar isla markaana waxqabadyada ciyaarta iyo madaddaala, gaar ahaan inta lagu jiro waqtiyada fasaxa dugsiga.

Waxay dugsiyada inta badan qabtaan nidaamyada ciyaarta inta lagu jiro waqtiyada fasaxa waxayna yahiin ilaaha muhiimka u ah wararka ku saabsan mashruucyada ciyaaraha kale iyo madaddaalooyinka ay ka mid yahiin naadiyada dabaasha iyo ciyaaraha isbortiga. Waxaa mahadda leh shaqada ay qabtaan ururada ah sida ururada ciyaaraha deegaanka iyo 4Children, dugsiyo aad iyo aad u badan waxay haatan bixiyaan fursadaha ciyaaraha ka dib dugsiga.

Waa inaad ogaataa si kastaba ha noqotee, in waxqabadyada qaarkood, kharashka lagu bixiyo in la soo dallici karo.

Waxii warar dheeri ah ee ku saabsan ciyaaraha iyo raaxaysiga in laga heli karo warqadda xaqiiqo-doonka ee Contact a Family ee **Holidays, Play and leisure (Fasaxyada, Ciyaarta iyo raaxaysiga)**, lagana heli karo khadka caawinaadda ama xafiiska deegaanka, oona bixin karo warar intaa ka sii dheer ee ku saabsan kooxaha iyo waxqabadyada ee aaggaaga. Waxaa wararkaan laga heli karaa oo kale:

- Maktabadda deegaankaaga
- Raaxaysiga deegaankaaga ama Adeegga Dhallinyarada
- Hawlwadeenka Bulsho ee cunuggaada ama Kooxda Caruurta Curyaamiinta ah
- Urur qarameedka.(kala soo xiriir khadka caawinaadda faahfaahinada dheeriga ah)

Xubnaha Kale ee Qooyska

In la haysto cunug curyaan ah waxay taabanaysaa dhammaan qooyska. Waxaa ka mid ah wiilasha wada-dhashay, gabdhaha wada-dhashay, eedooyinka, adeerada iyo awoowayaasha. Waxay inta badan u keenaysaa in xubnaha badan ee qooyska u baahdaan warar iyo kaalmo, ee ma aha keliya waaliddiinta.

Kuwa la walaalaha ah caruurta curyaanka ah weey dareemayaan taa sababta oo ah xanaanaynta dheeriga ah ee walaalkood ama walaashood, waxaa jirto inta badan loo hayn waqti baahidooda. Waa xadidan yahay waxqabadka qooys kasto bacdamaa ay waaliddiinta doonayaan inay wax badan ka qabtaan bahida ay dhammaan qabaan caruurta qooyska taasi oo ugu keeni karto culays dheeri ah guriga. Waxaa kale oo jiri karo doowr muhiim ah ay ka ciyaari karaan saaxibada iyo qaraabada kale oo awoodi karaan inay siiyaan waqti gaar ah wiilasha iyo gabdhaha walaalaha ah, ama ku soo dabaali karaan waxqabadyadooda oo ay si kale u dhumin lahaayeen. Waxay kuwo badan oo wada dhashay ay u arkeen inay waxtar lee-dahay in lagu so darsamo kooxda wada dhalatay ee deegaanka. Waxyaabaha faa'iidada ah ee kuwa wada dhashay ay ku jirto isla-kulanka kuwa kale ay xaaladdooda isku mid ka yahiin, inay wadaagaan fikradaha ku saabsan la qabsiga xaaladaha adag iyo inay wada qaataan waqti fiican.

'Waxay iga caawintay inaa ogaado inaan ahayn keli markii aan la joogo wiilal iyo gabdho wada-dhashay oo curyaan ah.'

Waxaa jiraan warar badan oo haatan ku qoran maskaxda caruurta, ay ku jiraan labada shabakadood ee internet-ka halkaasi o ay caruurta ay kuwa xiriiri karaan. Waxay ka heli karaan http://www.sibspace.org iyo http://www.thearc.org/siblingsupport. Contact a Family waxay soo saartay warqad xaqiiq ah ee lagu magacaabo 'Siblings'

Waxay awoowayaasha u baahan karaan xitaa kaalmo waxayna badanaa ka welwelsan yahiin caruurtooda iyo caruurta ay u yahiin awoowayaal. Waxay intooda badan dareemayaan inay ka baxsan yahiin si ku xiridda wararka caadiga ah waxayna ka welwelaan waxa ku saabsan sida ugu fiican ay u caawini karaan. Contact a Family wuxuu soo sarey **'Grandparents'** factsheet (**Awooweyaal**) oo la la heli karaa iyada la soo waydiisto. Waa inasan awoowayaasha iyo qaraabada kale ka welwelin inay soo waydiistaan wararka. Waxay ka caawinaysaa inay gartaan xaaladda iyo la socdaan cunugga xaaladdiisa- waxay waaliddiinta ugu yaraan ku qancayaan inuu jiro qof ka mid ah qooyska oo garanaayo curyaanimada cunuggooda. Contact a Family waxay ku farxaysaa inay ka maqasho xubnaha qooyska oo doonayaan warar intaa ka sii badan.

Ururada Iskaa wax u Qabso, kooxaha kaalmaynta iyo La soo xiriiridda Waxtarka leh

Nidaamka Iskaa wax u Qabso iyo jaalliyadda iyo kooxaha waxay noqon karaan ilo aad muhiim ugu ah caawinaadda iyo kaalmaynta.

Waxay ku siin karaan:

- Inaad la xiriirtid waaliddiinta kale oo haystaan caruurta curyaamiinta ah ama ay haysato xaalad caafimaadeed oo gaar ah;
- Warar iyo talosiin ku saabsan cudurka cunuggaada ama xaaladdiisa;
- Talosiin waxqabad leh, tusaale ahaan, gargaarka lacageed ama qalabka, waxbarashada iyo wararka deegaanka;
- Qof aad kala hadashiid waxa ay ku saabsan yahiin welwelkaada ama dhabaatooyinkaada;
- Soo booqashada guriga ama adeegyada fadhiyada;
- Adeegyada dheeriga ah, tusaale ahaan, gaadiidka, caawinaadaha, qalabka ama amaahda waxyaabaha ay caruurta ku ciyaaraan;
- Talo ku bixinta telefoonka;
- Imaanshaha xarumaha;
- Caawinadda lacageed;
- Waxyaabaha daabacan iyo wargaysyada yar-yar;
- Nidaamyada ciyaarta fasaxa dugsiga;
- Helitaanka ah in lagu daro wax siismada.

Kooxda Kaalmaynta

Waxaa jiraan noocyo badan oo ah kooxaha kaalmaynta. Waxaa jiri karto kooxda deegaanka ee kaalmaynta waaliddiinta haystaan caruurta curyaamiinta ama qaba xaalad caafimaadeed. Waxaa kale oo jiri karo kooxda kaalmaynta deegaaneed ama qarameed ee waalidka haysto caruurta leh isla curyaanimada ama xaalad sida cunuggaada. Waxay dad badan u arkaan inay waxtar tahay in lagala hadlo qof waxa ku saabsan dhibaatooyinkooda iyo welwelkooda oo ay la yeeshaan waaliddiin kale ama ay la qaybsadaan waayo-aragnimadooda. Waxay kooxo deegaaneed abaabulaan waxqabadyada qooyska iyo nidaamyada ciyaarta, waxay soo saran wargaysyo yar-yar waxayna bixiyaan warar iyo kaalmayn. Si loo ogaado waxa ku saabsan kooxaha waalidka, fadlan soo wac Khadka Caawinaadda ee Contact a Family.

La soo Xiriiridda Waxtarka leh

Contact a Family waxay lee-dahay kaydka ururada bixin karaan caawinaadda iyo talosiinta dheeriga ah ee ku habboon baahida qooyskaaga. Fadlan la soo xiriir khadka caawinadda si aad u heshid warar dheeri ah.

Waxaad kale oo ogaanaysaa in adeegyada iyo shuruucda Wales, Waqooyiga Ayrishka iyo Scotland kala duwan yahiin, sidaasi darted, fadlan xafiiska ku habboon ee Contact a Family haddii aad u baahato gacansiin dheeri ah.

Ururada qarameed ee soo socdaan waxay lee-yahiin adeegyada tarjumidda iyo qoraal beddelidda.

Carers UK, 20/25 Glasshouse Yard, London EC1A 4JT Tel: 0808 808 7777 CarersLine (Arbaco & Khamiis, 10ka-12ka iyo 2-4ta) e-mail: info@ukcarers.org Shabakadda internet-ka: http://www.carersuk.org *Waxuu bixiyaa adeegga wararka iyo talosiinta oo leh doowrka xanaanaynta.*

Advice Guide, Shabakadda internet-ka: http://www.adviceguide.org.uk/
Waxuu khadka internet-ka ee adeegga Xafiiska Talosiinta Muwaadaniinta (XTM) ku siinayaa talo madaxbanaan ee ku saabsan xuquuqdaada.

Waxaa ka mid ah arrimaha waxqabad, warar lagu kalsoonaan karo oo casri ah ee ku saabsan moowduucyo ballaaran, ay ku jiraan gargaarka lacageed, guriyeenta, shaqada iyo daynta, macmiilka iyo arrimaha sharciga ah. Waxaa kale ku jiraan faahfaahinada CAB-ka deegaankaaga CAB.

The Benefits Enquiry Line (Khadka Waydiinta Gargaarka lacagta), Tel: 0800 88 22 00 (Tel: 0800 22 06 74 ee Waqooyiga Ayrland) *Waxuu kaa caawinayaa buuxinta foomamka waxuuna ugu diri karaa fax xafiiska deegaanka ee gargaarka lacagta.*

Department for Work and Pensions (DWP) (Waaxda Shaqada iyo Hawlgabka (DWP)), Shabakadda internet-ka: http://www.dwp.gov.uk/otherlanguages/ Shabakadda internet-ka ee DWP waxaa ku jiraan warqadaha ku tarjuban luqado kala duwan.

MultiKulti, Shabakadda internet-ka: http://www.multikulti.org.uk/

Shabakadda internet-ka ee MultiKulti waxay bixisaa wararka iyo talosiinta ku saabsan gargaarka barwaaqaynta lacageed, guriyeenta, soo-galootinimada iyo magangelyo-doonka, caafimaadka iyo shaqada.

The Immigration Advisory Service (IAS) (Adeegga Talosiinta Soo-galootinimada (IAS)), Tel: 020 7967 1200 Isniin - Jimcaha, laga soo bilaabo 09:00 - 18:00. Shabakadda internet-ka: http://www.iasuk.org/ *Waxuu IAS yahay urur samafal ee diiwangashan waxuuna bixiyaa talosiin madaxbanaan ee ku saabsan soo galootida, megangelyo-doonka iyo arrimaha jinsiyadda. Waxaa kale oo uu bixiyaa inuu wakiil ka noqdo dadka loo diiday inay soo galaan ama ay joogaan Midowday (UK) una leh xaq inay ka qaataan racfaan lid ku ah go'aamadaasi oo kale. Waxay IAS xafiisyo ku lee-dahay UK iyo Sylhet, Bangladesh.*

Enquire, Caruurta ku nool Scotland, 5 Shandwick Place, Edinburgh, EH2 4RG, Tel: 0845 123 2303, Text: 0131 222 2439, Email: info@enquire.org.uk, Shabakadda internet-ka: http://www.enquire.org.uk *Waxaa lagu bixiyaa talosiinta qaranka ee Baahida Gaarka ah ee Waxbarasho ee Scotland*

Family Fund, Unit 4, Alpha Court, Monks Cross Drive, Huntington, York YO32 9WN Tel: 0845 13045 42 e-mail: info@familyfund.org.uk Shabakadda internet-ka: http://www.familyfund.org.uk *Waxay bixisaa deeq iyo warar loogu talogalay qooysaska xanaaneeyo caruurta qabo curyaanimo aad u xun ama aad u jiran caruurtaasi oo ka yar 16 jir.*

Vitalise (oo horay loo oran jiray the Winged Fellowship Trust), Angel House, 12 City Forum, 250 City Road, London EC1V 8AF Tel: 0845 345 1972 Shabakadda internet-ka: http://www.wft.org.uk *Waxay bixisaa nasashada xanaaneeyayaasha iyo fasaxyada dadka qabo curyaanimada jirka.*

Wararka dheeriga ah ee ku saabsan Contact a Family

Waxay Contact a Family ka shaqaysaa dhammaan UK si ay u kaalmayso qooysaska hayaan caruur curyaan ah. Waxuu Khadka caawinadda yahay adeeg telefoon oo bilaash ah, oo ka siinaayo warar, talosiin iyo kaalmo waaliddiinta iyo xanaaneeyayaasha dhinac kasto oo ah xanaanaynta cunugga curyaanka ah. La-taliyayaasha Waalidka waxaa kale oo ay kala xiriirinayaan qooysaska kooxaha kaalmaynta qaranka xalaadaha gaarka ah iyo kooxaha kaalmaynta deegaanka ee qooysaska leh caruurta ay haysato curyaanimo kasto ama xaalad caafimaad. Halka aysan jirin shabakadda kaalmaynta, gaar ahaan markii ay jiraan cuduro aan aad caadi u ahayn, waxay la-taliyayaasha waalidka isku dayayaan inay ku xiraan qooyska si gooni-gooni ah. Waxay kooxdeena Buug kaydka iyo Wararka wax ka qabanayaan baaritaanada kaga imaanaayo shaqaalaha Xirfadlayaasha ah waxaana laga la soo xiriiri karaa lambarka isku-xirka dhexe.

Disembar 2004tii Contact a Family iyo Lady Hoare Trust iskugu soo darsameen delladda Contact a Family. Waxay the Lady Hoare Trust u keentay Contact A Family kooxda waayo-aragga ee hawlwaeeenada bulshada oo ka soo shaqeeyay UK. Waxay kooxdaan oo ah hawlwadeeno bulsho waxay tijaabinayaan si waji ka waji ah ee cusub ‘Adeegga Kaalmaynta Qooyska ‘ ee Contact a Family qaybo ka mid ah UK, iyada oo ka baxsan London.

Hawlwadeenadaan ee Qooyska waxay danaynayaan inay ka caawiyaan si waqti gaabaan ah qooysaska leh caruurta curyaamiinta ah oo 0-19 jirka ah.

Haddii aad u malaynaysid inaad doonaysid caawinaad kaaga timaado xagga Hawlwadeenadeena Qooyska ee cusub, oo aadna jeceshahay inaad ogaato haddii laga helaayo midkood aaggaaga, fadlan naga la soo xiriir adiga oo soo wacaayo khadka caawinaadda ee Contact a Family ama la soo xiriir xafiis gobaleedka ama qaran ee Contact a Family.

Waxaan talo siinnaa waaliddiinta jecel inay samaystaan kooxda kaalmada ama doonaayo inay samaystaan shabakadda qaran ee qooysaska leh caruurta isla xaaladda gaarka ah. Waxaan xitaa soo saarnaa ‘Contact a Family Group Action Pack ‘ (Baakadka Kooxda Waxqabadka ee Contact a Family), ee u ah tusmo-hagid macquul ah qof kasto oo doonaayo inuu samaysto ama horumariyo koox. Waxii warar dheeri ah, fadlan kala soo xiriir khadka caawinaadda.

Sidaasi oo kalena xafiiska UK, waxay Contact a Family ku lee-dahay xafiisyo tiro ah dhammaan UK (hoos fiiri). Waxay sameeyaan dood-kooxeedka waaliddiinta ee ku saabsan dhinacyada kala duwan ee xanaanaynta cunugga curyaanka ah waxayna sidaasi oo kalena soo saarta wargayska yare e deegaanka iyo wararka ku saabsan waxa ay ka heli karaan qooysaska aagaggooda.

Waxay Contact a Family ku lee-dahay koox ballaaran UK oo ah mudadawaciinta Wakiilada Aagga Deegaanka, oo wada ah dhammaan waaliddiinta caruurta curyaamiinta ah. Waxay bixiyaan kaalmo iyo wararka, waxayna awoodaan inay ku tilmaamaan ilaha ugu fiican ee ah caawinaadda deegaanka ee ku salaysan aqoontooda iyo waay-aragnimadooda bacdamaa ay yahiin waaliddiin. Si loo arko haddii uu jiro Wakiilka aaggaaga, kala soo xiriir xafiiska Contact a Family telefoonka ah 020 7608 8700.

Waxaan kale oo aan daabacnaa tiro daabacaad waxtar leh oo ay ku jiraan The Contact a Family Directory: Specific Conditions, Rare Disorders and UK Family Support Groups” (Buugga Jiheeyaha ee Contact a Family: Xaaladaha Gaarka ah, Cudurada Dhifka ah iyo Kooxaha Kaalmaynta Qooyska ee UK). Si loo helo liis buuxo oo ah daabacaadyada fadlan kala soo xiriir khadka caawinaadda.

Xafiisyadeena

Contact a Family
209-211 City Road, London EC1V 1JN
Khadka caawinaadda: 0808 808 3555 (Isniin-Jimce, 10subaxnimo-galabnimo)
Textphone: 0808 808 3556 Tel: (020) 7608 8700
Fax: (020) 7608 8701 e-mail: info@cafamily.org.uk
Shabakadda internet-ka: http://www.cafamily.org.uk

Contact a Family Northern Ireland,
Bridge Community Centre 50 Railway Street, Lisburn BT28 1XP
Tel/Fax: (028) 9262 7552 e-mail: nireland@cafamily.org.uk

Contact a Family Scotland,
Norton Park, 57 Albion Road, Edinburgh EH7 5QY
Tel: (0131) 475 2608
Fax: (0131) 475 2609 e-mail: scotland@cafamily.org.uk

Contact a Family Cymru,
Room 153 S, 1st Floor, The Exchange Building, Mount Stuart Square,
Cardiff CF10 5EB
Tel: (029) 2049 8001 Fax: (029) 2049 5001
e-mail: wales@cafamily.org.uk

Contact a Family Waqooyi-Bari ee Gobolka England,
The Dene Centre, Castle Farm Road,
Newcastle upon Tyne NE3 1PH
Tel/Fax: (0191) 213 6300
e-mail: northeast@cafamily.org.uk

Contact a Family Waqooyi-galbeed ee Gobolka England,
6th Floor, St. James House, Pendleton Way, Salford M6 5FW
Tel: (0161) 743 0700 Fax: (0161) 743 0711
e-mail: northwest@cafamily.org.uk

Contact a Family Galbeedka Gobolka Midlands,
Prospect Hall, 12 College Walk, Birmingham B29 6LE
Tel: (0121) 415 4624 Fax: (0121) 415 4922
e-mail: westmids@cafamily.org.uk

Contact a Family Ealing,
1st Floor, St. Andrews Church Centre, Mount Park Road, London W5 2RS
Tel: (020) 8810 8151 e-mail: ealing@cafamily.org.uk

Contact a Family Lambeth,
256 Brixton Hill, London SW2 1HF
Tel: (020) 8671 7665 Fax: (020) 8671 7668
e-mail: lambeth@cafamily.org.uk

Contact a Family Lewisham,
1 Forman House, Frendsbury Road, Brockley, London SE4 2LB
Tel: (020) 7635 6333 Fax: (020) 7732 8494
e-mail: lewisham@cafamily.org.uk

Contact a Family Southall,
St. Georges Community Centre 8-12 Lancaster Road,
Southall UB1 1NW
Tel: (020) 8571 6381 e-mail: southall@cafamily.org.uk

Contact a Family Southwark,
Walworth Methodist Church, 54 Camberwell Road, London SE5 0EN
l: (020) 7277 4436
Fax: (020) 7703 6449 e-mail: southwark@cafamily.org.uk

Contact a Family Sutton,
Thornton Road Centre, 204 Thornton Road, Carshalton SM5 1NF
Tel. (020) 8404 1971 Fax. (020) 8404 1976
e-mail: sutton@cafamily.org.uk

Contact a Family Wandsworth,
1 Siward Road, London SW17 0LA
Tel: (020) 8947 5260 Fax: (020) 8947 9506
e-mail: wandsworth@cafamily.org.uk